



Guudmarka Deeqda Isku Xidhka Early Achievers

Deeqda Isku Xidhka waxay ka taageertaa kaqaybgalayaasha barnaamijyada barashada hore ee ka qaybgalaya Early Achievers si ay uga caawiso soo iibsiga qalabka manhajka, qalabka wax lagu barto, sahayda, teknooloojiyadda taageerta ee la xidhiidha hirgalinta nidaamka xaadiriska, iyo qalabka lagu hagaajinayo tayada barnaamijka.

Adeeg-bixiyayaasha daryeelka carruurta ee ka qaybgalaya Early Achievers waxay xaq u yeelan karaan inay helaan Deeqda Isku Xidhka oo qiimaha soo socota ah:

- Ilaa iyo \$750 Family Home Child Care
- Ilaa iyo \$1,000 Xarumaha Daryeelka Carruurta

Qaabka Qiimaynta U-qalmidda

Dhammaan kaqaybqaatayaasha Early Achievers waxay xaq u yeelan karaan deeq hal mar ah. Si ay ugu qalmaan, kaqaybgalayaasha Early Achievers waa inay soo buuxiyaan shuruudaha soo socda:

- Ka duwaangashan yihiin Early Achievers oo ka qaybqaadanayeen Heerka 2 muddo kayar 30 bilood oo ka bilaabanta taariikhda arjiga deeqda, ama Inay ka duwaangashanaayeen Early Achievers oo lagu qiimeeyay Heerka 2
- Xaruntaadu ay u adeegtaa carruurta aan da'da dugsiga gaadhin ee hela Kabitaanka State Child Care

IYO buuxisaa ugu yaraan mid ka mid ah kuwa soo socda:

- Ka duwaangashan tahay barnaamijka cuntada Heerka 1, ama
- Aad ku nooshahay degmo dugsiyeed kaasi oo u adeegta 20% carruur saboolka ah kuna salaysan xogta OSPI (macluumaad badan oo ah sida go'aan looga gaadho haddii degmo dugsiyeedkaagu uu buuxiyay shuruudahan, fadlan ka eeg Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo ee qaybta hoose)

Deeqaha Isku Xidhka waxa lagu soo iibsan karaa ashyaada noocyadaan soo socda ah:

- Qalabka lagu hagaajinayo Qiyaasta Qiimaynta Bey'adda (Environment Rating Scale, ERS) ama Habka Darajeynta Qiimaynta Fasalka (Classroom Assessment Scoring System - CLASS)
- Taageero teknooloojiyadeed oo hirgalinta nidaamka xaadiriska elektorooniga ah
- Horumarinta manhajka iyo qalabka waxbarashada
- Wakhtiga beddelka ah
- Koboca tabobarka iyo xirfadeed
- Sahayda ama qalabka kale ee lagu hagaajinayo tayada barnaamijka, sida loogu ansixiyey arjiga qorshaha kharash-garaynta

Qarashka loomu isticmaali karo in lagu hagaajiyo raasamaalka, kaararka deeqda, kordhinta mushaharada, nooc kasta oo abaalmarina, ama hawlaha diineed. Macluumaad badan oo ku saabsan kharashaadka aan la oggolayn, fadlan tixraac Hagayaasha Hawlaha Early Achievers, Qaybta 8: Taageerada iyo Dhiirigelinta Qiimaynta Hore.

Hawsha Arjiga

1. Dalbadayaashu waa inay buuxiyaan arjiga dhammaantii.
2. Arjiyada buuxa ayaa boostada, ama iimeelka loogu soo dirayaa DEL.

CINWAANKA BOOSTADA

Department of Early Learning
Attn: Early Achievers Needs-Based Grants
PO Box 40970
Olympia, WA 98504-0970

IIMEELKA

Needs.BasedGrants@del.wa.gov

Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo

Sidee kaqaybgaluhu ku ogaan karaa haddii uu u-qalmo degmo dugsiyeedka?

Degmo dugsiyeedka u qalma waxa ku jira kuwa ay ugu yaraan 20% ardayda ay helaan cuntada bilaashka ah ama laga yareeyay qiimaha. Si loo go'aamiyo haddii degmo dugsiyeed uu xaq u leeyahay, booqo Warbixinta Dugsiyada Dadweynaha Washington ee Xogta U-qalmidda Aagga (Washington Public School Data for Area Eligibility Report) ee Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction) ee ku taal bogga: <http://k12.wa.us/ChildNutrition/pubdocs/2016-17WaPublicSchoolDataAreaEligibility.pdf>.

Kaqaybgaluhu ma soo dalban karaa Deeqda Isku Xidhka, xitaa haddii uusan la shaqayn wakiilka Child Care Aware of Washington?

Xarunta Daryeelka Ilmuhu waxay dalban kartaa Deeqda Isku Xidhka iyada aan la shaqaynin Wakiilka Child Care Aware of Washington, laakiin *Family Home Child Care waa inuu arjigan u saxeexaa wakiilkoodu.*

Xarumaha ECEAP Early Achievers ee haysta dariiqa shatiga ma soo codsan karaan deeqda?

Haa.

Kaqaybgaluhu ma soo dalban karaa Deeqda Isku Xidhka, xataa haddii uusan u adeegin carruurta hesha kabitaanka State Child Care?

Maya, u shaqaynta carruurta aan gaadhin da'da dugsiya oo qaata kabitaanka gobolka ayaa ah shardi u-qalmid.

Deeqda ma loo isticmaali kara inuu kaqaybgale iskaga bixiyo lacagta waxyaalo u hore u soo iibsaday?

Maya, maalgalintan waxa kaliya oo loo isticmaali karaa khayraadka lagu sheegay arjiga Deeqaha Isku Xidhka marka deeqda la oggolaado.

Kaqaybgaluhu ma codsan kara qiime ka badan inta la oggol yahay?

Maya. \$750 waa qiimaha ugu badan ee kaqaybgalayaasha daryeelka carruurta guriga qoyska iyo \$1,000 oo ah qiimaha ugu sarreeya ee kaqaybgalayaasha xarumaha daryeelka carruurta iyo kuwa tubta shatiga ECEAP. Deeqda lama bixin karo qiime ka badan qiimaha u sarreeya ee deeqda.

Ma lagu qiimayn karaa xaruntu inay hesho Deeda Baahida Ku-Salaysan?

Haa, hasa ahaatee, goobaha lagu qiimeeyo Heerka 2 oo kaliya ayaa u qalma.

Daryeel-bixiyaha ma laga doonayaa inuu meel ku hayo rasiidada?

Haa. Sida ku qeexan Shuruudaha iyo Xaaladaha arjiga Deeqda Isku Xidhka, xarunta qaataha waa inay hayaan dhammaan rasiidada caddaynaya soo gadashada la xiriira lacagaha deeqda ah muddo 7 sano ah, oo oggolaadaan in ay siiyaan rasiidada iyo waraaqaha Waaxda Waxbarashada Hore ee dhammaan alaabta la soo iibiyay ee la xiriirta deeqdan, marka laga codsado. Ku guuldarreysiga fulinta shuruudahaan waxay keeni doontaa in xarunta ay dib ugu celiso qayb, ama dhammaan deeqda DEL.

Waa maxay sababta igu waajibisay inaan haysto Lambarka Lacag-qaataha ee Gobolka oo Dhan?

Deeqaha Baahiyaha ku-Salaysan waxaa si toos looga siiya deeq-qaatayaasha gobolka. Gobolka Washington waxa uu ka doonayaa qof walba oo lacag ka helaya gobolka inuu isku diiwaangeliyo bixiye ahaan.

Haddii aadan hubin inaad leedahay lambar SWV, waxaad ka ogaan kartaa halkan:

<http://www.des.wa.gov/services/ContractingPurchasing/Business/VendorPay/Pages/VL.aspx>.

Haddii aanad lahayn lambar, mid ayuu kuu samayn karaa markaad buuxiso oo aad soo gudbiso foomka aad halkan ka helayso:

https://del.wa.gov/sites/default/files/public/Licensing/StatewideVendorForm_English_Provider.pdf oo DEL boosta ugu soo dir.

Wixii macluumaad dheeraad ah sida loo buuxinayo foomkan waxaa laga heli karaa

<https://del.wa.gov/Statewide-Vendor-Forms>.

Kaqaybgaluhu ma heli karaa Deeqda Isku Xidhka wax hal mar ka badan?

Deeqda Isku Xidhka waxaa wakhtigan la heli karaa deeq **hal mar** oo daryeel-bixiyayaasha u qalma loogu talagalay. Deeqda waxa loo helayaa sida loo soo kala horreeyo, waanay xaddidan tahay Deeqda Isku Xidhku. Iminka u dhaqaaq!

Muxuu kaqaybgaluhu filan karaa kadib markii arjiga Deeqda Isku Xidhka la gudbiyo?

Marka uu na soo gaadho arjiga Deeqda Isku Xidhku, Waaxda Waxbarashada Hore waxay qaadi doontaa xaqiiqo-raadis tayada ah si ay u xaqiijiso inuu arjigu buuxo iyo inuu dalbaduhu buuxiyay shuruudihii u-qalmidda. Ogaysiinta ah in la helay ayaa markaas loo diraya kaqaybgalaha. Haddii aanu arjigu dhammaystirnayn, haddii aanu dalbaduhu buuxin shuruudaha u-qalmidda, ama haddii aanu daryeel-bixiyuhu lahayn Lambarka Lacag-qaataha ee Gobolka oo Dhan (SWV), arjiga waa la diidayaa dalbadahana waxaa la siinayaa wargalin ay la socoto tilmaamaha dib uu ugu dalban karo haddii ay ku munaasab tahay.

Arjiyada dhammayska tiran ee wata lambarada SWV oo sax ah ayaa nidaamka la mariyaa si loo ansixiyo oo kharashkana loogu bixiyo. Guud ahaan hawshaasi waxay qaadataa 4-6 toddobaad.

Marka foomamka loo gudbiyo lacag-bixinta, ogaysiin dheeraad ah ayaa loo diraya kaqaybgalaha. Ogaysiisyada caadi ahaan waxaa lagu soo diraya iimeel (marka ay suurtoagal tahay).

Yaan la xiriiri karaa haddii aan qabo su'aalo ku saabsan u-qalmidda ama kharash-garaynta?

Kaqaybgalayaashu waxay iimeel ugu soo diri karaan DEL Needs.BasedGrants@del.wa.gov.